**Xukuumadda Soomaaliya**
**Sharciga 18 Febraayo 1960, lamba. 10 Diwaan**
**Maalgashiga Dibedda ee Soomaaliya**

MAAMULAHA

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeer-dejinta;

WUXUU XEERINAYAA OO UU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

## Qod. 1
## Qeexidda Maalgashi Debadeed

Dadka sharcigu sameeyey iyo dadka dabiiciga, ee ajaanibta, iyo weliba muwaadiniinta soomaaliyeed, ee deggan dibedda, kuwaas oo ku talajira in ay dibedda u wareejiyaan lacag adag, ee ajnabi (shisheeye), kaddib dhaqangalka sharcigan, iyo ayaga oo cuskanaya (adeegsanaya) axkaamta isla sharcigaas (ayadaas), waa in ay wargelin hor-dhac ah ku siiyaan, warqad diiwaangashan oo hubaal-celin leh, Guddoonka Golaha – Xafiiska qorshaynta, ayaga oo siinaya (hordhogaya) arrimo ku caawinaya in ay kala caddeeyaan haddii maagashiyada qudhoodu yihiin kuwo loogu talagay xagga abuurista shirkado cusub, ee wax-soo.saar ama xagga fidinta, cusbooneysiinta, dib-u-kicin ama wax-ka-beddelid shirkado jira.

Maalgashiyada kor ku xusan waxaa lagu sameyn karaa xataa, ayada oo loo marayo tabarrucaad makiinado, qalab, cadad dayactir, dhismooyin wershadeed, alaabooyin dhismo iyo wixii saad kale oo wax looga qabanayo dhismooyinka warshadeed ama horumarinta shirkadda, bishardi in aysan ahayn kuwo lagu sameeyey Soomaaliya; soodejinta (so-waaridda) laga hadlaayo waxa ay hoos-imaaneysa (lagu dhaqayaa/dabbaqayaa) axkaamta q xiga, ee qodobka 13aad. Qiimaha maalgashiyadaas waxaa lagu goynayaa qaddar la eg qiimaha ay xaqiijisay dekedda xagga alaabad la soo dejiyey (la soo waariday).

Waxaa loo qaadayaa (aqoonsanayaa) maalgashiyo dibadeed, sida uu qabo qodobka hore, xataa wareejinta xuquuqaha ka faaiideysiga ruqsadaha waxayaabaha la hindiso, sumadaha wershadeed iyo ruqsadaha looga baahan yahay mashruuca maalgashiga. Qiimaha wareejimahaas xuquuq waxaa goynaya Guddiga xagga maalgashiyada dibadeed.

## Qod. 2

Dhismaha iyo xubnaha uu ka kooban yahay Guddiga maalgashimada dibadeed

Isla markii la helo wargelinta ku xusan qodobka la soo dhaafay, Guddoonka Golaha - Xafiiska qorshaynta – waxa uu ku dhaqaaqayaa in dalabka hor-dhigo Guddiga Maagashiyada Dibadeed (GMD).

Guddigaas waxa uu ka kooban yahay:

a) — Wasiirka Kowaad, oo shir-guddoominaya;
b) — Wasiirrada Maaliyadda, Wershaha iyo Ganacsiga, Hawlaha Guud, Isgaarsiinta, Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha;
c) — Madaxa Xafiiska Qorsheynta, ee Guddoonka Golaha;
d) — Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud, ee Sanduuqa Wareegga Lacageed, ee Soomaaliya;

e) — Lix khabiir ee uu soo magacaabay (cayimay) Golaha Wasiirrada iyo
f) — Saddex wakiil ee ka socda Rugta Ganacsiga, wershadha iyo Beeraha, ee ay soo magacaawday isla rugta.

Xubnaha Guddiga waxaa lagu magacaabaa Xeer uu soo saaro Madaxa Qaranka (Madaxweynaha)., kaddib soojeedinta Wasiirka Kowaad iyo ka hor, xagga xubnaha ku xusan xarfaha e) iyo f) magacaabisyada la saadaalinayo, waxa ayna xilka haynayaan laba sano.

Isla habraacaas waxaa loo marayaa beddelkooda, haddii, sabab kasta ha noqotee, ay shaqada ka joogsadaan ka hor dhicitaanka muddo-xileedka;

Kulamada Guddiga waxaa lagu casumi karaa in ay ka soo qaybgalaan, ayaga oo aan xaq u lahayn codbixinta, khuburo iyo farsama-yaqaanno takhasus gaara leh.

Xilalka (waajibaadka) Xoghayaha Guddiga waxaa qabanaya Madaxa Xafiiska Qorsheynta, ee Golaha Wasiirrada.

Guddigu waxa uu kulayaa ugu yaraan hal mar bishiiba, haddii Wasiirka Kowaad uu maqan yahay ama ay jiraan xaalada shaqada ka hor-istaagaya, Guddiga waxaa shirguddoominaya wasiir kale, ayada oo la raacayo nidaamka kala horreynta Wasiirrada kala duwan, ee uu dhigayo Nidaamka hawlaha Golaha Wasiirrada.

**Qod. 3**
**Xilka Guddiga Maalgashiyada Dibadeed**

Guddiga Maalgashiyada Dibedda waxa uu leeyahay waajibaadka soo socda:

1) in uu góaamiyo, haddii dalab maalgashiga uu leeyahay shuruudaha wax-soo-saaridda, ee ku xusan qodobka 4aad, ee xiga;
2) in uu weydiiyo xubinta hayadda, ee awoodda ikhtisaas u leh, haddii dalabka maalgashigu uu ku jiro ama uusan kujin qorshaha horumarin dhaqaale, ee Soomaaliya;
3) in uu u ruqseeyo Sanduuqa Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya in uu dedejiyo bixinta lacagta adag, marka taasi aysan ku jirin lacagaha sida xorta looga wada-xaajoodo, ayada oo lagu saleynayo sharciga jira;
4) in uu ku diiwaangeliyo raasumaallada dibadeed lacagta adag, ee asalka, haddii cadd§aan ahaan loo soo waariday ama lacagta adag oo asal ah oo lagu qoray qoraallada (dokumentiyada) lagu soo gudbiyey xaaladaha kale;
5) in uu rugseeyo qiimeeyana si loo loogu sameeyo diiwaangelin ku saleysan la soo gudbiyey, qiimaha (qiimooyinka) caalamiga ah iyo aaraàda khuburada, xuquuqda ikhtiraaca (wax hindisdda) iyo xuquuqda kale oo laga soo wareejiyey dibedda;
6) in uu diiwaangeliyo raasumaallada dibadeed oo ka jira Soomaaliya, dhab ahaan sida ku qeexan qodobka 6aad, ee soo socda, ayada oo la goynayo qaddarka iyo lacagta adag oo asalka xagga ujeedooyinka iyo saameynta dabbaqidda sharcigan;
7) in uu diiwaangeliyo , ayada oo lagu kordhinayo raasumaalka, dib-u-maalgashiyada faaiidooyinka loo soo sheegay sí waafaqsan qodobka 8aad iyo in uu góaamiyo xagga wixii ku saabsan ruqsooyinka uu dalbayo isla qodobkaas;
8) in uu diiwaangeliyo shirkadaha leh , kaddib biirada (tabarucaadka ku xusan lambarrada 4, 5, 6 iyo 7, ee qodobkan, ugu yaraan boqolkiiba 51 raasumaalka dibadeed, ee diiwaangashan;
9) in uu góaan ka qaato xagga murumada ka dhex aloosmi kara maalgashadaha iyo Wasiirka Wershadaha iyo Ganacsiga xagga wareejinta raasumaallada iyo faaiidooyinka ku xusan 7 iyo 12 ee soo socda;

10) in uu fududeeyo degganaansho siinta dadka ganacsatada, khubarada, farsamayaqaannada iyo shaqaalaha ajaanibta ah, sí waafaqsan axkaamta qodobka 17aad, ee soo socda;
11) in uu ruqseeyo (idmo) dibed u-wareejinta ajuurooyinka iyo mushaharooyinka iyo xaqal ciidka ka baxsan qaddarka ugu yar, ee uu dhigayo qodobka 17aad, ee soo socda;
12) inuu hubiyo *kontroolo dhowrmada shuruudaha loo dejiyey hawlgallada deyn/qaadashada mudda dhexe iyo tan muddada dheer iyo soo saaridda waajibaadka (qoraallada deynta saamiga ah), ee ku xusan qodobka 10aad, ee soo socda;
13) in uu ruqseeyo gelidda heshiisyada la xiriira deymaha dibadeed sí ka jarjumeysa macnaha iyo saameynta ku xusan qodobka 11aad, ee soo socda;
14) in uu raaco habsocodka maalgashiyada dibadeed warbixin muddeysanna ka siiyo Guddiga isku-dhafka, ee wasaaradaha, ee xagga horumarinta dhaqaalaha, ayaga oo qaabeynata aragtiyada iyo wixii soojeedin ah oo khuseeya arrinta;
15) in uu hirgeliyo adeeg la-talin farsamo oo ku jaheysan dadka doonaya in ay raasumaal (raasumaallo) u wareejiyaan Soomaaliya, ayaga oo bixinaya macluumaadka lagama maarmaanka, ee la xiriira, sharciyada iyo tallaabooyinka maamuleed, ee soomaaliyeed, iyo weliba akhbaarta leh dabeecad dhaqaale iyo tirokoobeed oo la dalbayo;
16) in uu guto hawlaha laga dalbayo xagga arrimaha maalgashiga (maalgashinnada) dibadeed, ee lagu sameynayo gudaha Soomaaliya iyo in uu diyaariyo wixii soojedin ah, ee la xiriira xagga kordhinta iyo horumarinta ayagaas.

**Qod. 4**
**Qeexid Shirka Wax-soo-Saar leh**

Xagga macnaha iyo saameynta sharcigan, waxaa shirkado wax/soo/saar leh loo qaadanayaa kuwa leh duluc soo saarid hanti ama adeegyo, sida shirkadaha, fulinta waxqabadkooda awgiis, u baahan fulinhawlo geedgoyn , kurtimo-bixin dhulka waraabinta iyo dhul hagaajin, dhisid guryo (wershado), waabab, matoorro koronto dhaliya iyo khadad daabulaadda tamarta, ceelal qodis, dhuumo biyo qaada, waro,nafakhyo (dusmooyin), dhisidda jidad, buundooyin (kaabado) iyo guryo, xataa loo isticmaalo hoteello, dhisidda iyo isticmaal maraakiib (doomo) iyo diyaarado.

Marka laga eego xagga maxnaha iyo raadka saameynta, shirkado wax soo saarka leh waxaa loo loo qaadanayaa (tixgeliyaa) inay yihiin kuwa iyagu dulucdoodu tahay soo saarista hanta (badeecado) ama adeegyada, sida shirkadaha, si ay u fuliyaan howlahooda, u baahan hawlo diyaarin (geed-qaad dhul/hagaajin), waraab iyo hagaajinta dhulka. , rakibidda warshado, dhisid waabab, matoorro iyo khadadka gaadiidka tamarta, qodista ceelasha, biyo mareenada, wabiyada iyo waraha tuneellada, dhismaha waddooyinka (kaabadaha), buundooyinka, iyo dhismayaasha, oo ay ku jiraan adeegsiga hoteelka, dhismaha iyo adeegsiga doomaha iyo diyaaradaha.

Waxaa kale oo shirkado adeeg-soo-saara loo qaadanayaa (loo yaqaan) kuwa fuliya hawl la xiriirta wixii sahmin, hubin (kontrool), baaritaanno iyo duleelin oo la xiriira baaritaab batorool ama macdin oo ay fuliyeen shirkado dibadeed oo u asteysan shirkado Soomaaliya ku la jira heshiisyada ku xusan qodobka 20aad, ee soo socda.

## Qod. 5
## Habraaca iyo Muddooyinka Diiwaangelinta

Marka la gudbo (la dhaafo) muddada lixdanka maalmood ah, codsadaha (dalbadaha) waxa uu karaa, asaga diraya warqad diiwaangashan oo hubaalcelin leh, in uu dalbo dedejinta jawaabtaas. Haddii warqaddaas diiwaangashan oo hubaal-celinta leh ay soo gaari weyso soddon maalmood kaddib taariikhda helitaanka warqaddaas, maalgashiga waxaa loo qaadanayaa mid waxsoo saar , waxaana la caddeynayaa in uu ku jiro qorshooyinka horumarinta dhaqaale, ee Soomaaliya, maalgashadahana waxaa loo oggolaanayaa bursiinooyinka (faaiidooyinka) ku xusan sharcigan.

Xafiiska Qorsheynta, ee guddoonka Golaha Wasiirrada, marka uu hubiyo, ayaga oo ka ambaqaadaya dalab ka yimid daneeyaha, in maalgashigu uu keeney natiijo ah abuurista, ballaarinta, cusbooneysiinta, isbeddeka ama dib-u-dhaqaajinta (dib-u-kicinta) shirkadda la soo sheegay (la saadaaliyey), waxaa uu caddeyn waafaqsan siinayaa maalgashadaha, 90 maalmood gudahooda, laga bilaabo taariikhda codsiga (dalabka) horey loo soo sheegay, ee hubinta. Caddeyntaas waxa ay keeneysaa (khasab ka dhigeysaa diiwaangelinta maalgashiga, waxayna noqoneysaa taariikhda ay ka bilaabanayaan xuquuqda iyo waajibaadka ka imanaya (ka dhalanaya) sharcigan.

## Qod. 6
## Habka Fidinta Maalgashiyada Dibadeed Horey u Jiray

Guddigu waxa uu idmayaa (amrayaa/ruqseynayaa) diiwaangelinta, asaga oo goynaya inta uu la egyahay raasumaalka dibadeed oo ay shirkaddu maalgashatay oo lala xriirinayo qiyaasta hantida guud, ee shirkadda, ayada oo lagu saleynayo macluumaadka ay bixisay cidda ay khuseyso (ka danta leh) iyo caddeynta ay ciddaas bixisay sanadka lagu gudajiro, sí loo gaaro ujeeddooyinka hubinta canshuuraha saaran dakhliyada ku xusan sharciga 16 noofember 1957, lamba. 15.

Qiimaha raasumaalka dibadeed, ee la maalgashaday, waxaa loo qaadanayaa in uu la egyahay cadadka (tirada) hantida oo saas loo qiimeeyey. Lacagta adag ee asalka ah waxaa goynaya Guddiga, ayada oo la la xiriinayo jinsiyadda shirkadda ama milkiilaha, amaba qoraallada (dokumentiyada) ay keentay cidda ay khuseyso (ka danta leh).

Marka ay jirto xaaladdan, Guddigu waxa uu ku khasban yahay in uu qaato góaankiisa 180 maalmood gudahooda oo ka bilaabata soo gudbinta codsiga (dalabka), taariikhda wargelinta,ee la xiriirta isla góaanka, waxa ay noqoneysaa, wax kasta oo dhaca, taariikhda diiwaangelinta.

Marka la gudbo (la dhaafo) muddada boqolka iyo siddeetanka maalmooda ah, codsadaha (dalbadaha) waxa uu karaa, asaga diraya warqad diiwaangashan oo hubaalcelin leh, in uu dalbo dedejinta jawaabtaas. Haddii warqaddaas diiwaangashan oo hubaal-celinta leh ay soo gaari weyso soddon maalmood kaddib taariikhda helitaanka warqaddaas, maalgashiga waxaa loo qaadanayaa mid wax-soo-saar, waxaana la caddeynayaa in uu ku jiro qorshooyinka horumarinta dhaqaale, ee Soomaaliya, maalgashadahana waxaa sí majaal ah loogu oggolaanayaa bursiinooyinka (faaiidooyinka) ku xusan sharcigan.

Wargelinta ku jahaysan maalgashadaha, ee ku xusan xubinta (faqradda)

saddexaad, ee qodobkan, waa in, sidoo kale, la sugo (la caddeeyo), haddii maalgashiga loo qaattay mid miradhal ah (wax-soo.saar leh), sida laga fahmaayo qeexidda (qeexitaanka) ku xusan (cad) qodobka 4aad, ee la soo gudbay (dhaafay), loona oggolaaday bursiinooyinka la xiriira amaba aan miro-dhal ahayn waxaa loo nidaaminayaa sida maalgashiyada uu nidaaminayo qodobka 12aad, ee soo socda.

Laga bilaabo taariikhda diiwaangelinta, maalgashiga dibadeed waxa uu yeelanayaa faaiidooyinka uu jideynayo sharcigan, oo laga reebo dhaafidda dekadeed iyo canshuuraha ku xusan qodobka 13aad, ee soo socda.

**Qod. 7**
**Wareejinta Faaiidooyinka iyo Raasumaalka**

Faaiidooyinka, dakhliyada ka yimaada hantida, dul-saarka iyo muraha, xaggamaalgashiga la gelinayo hantida maguurtada ah ama gagaar, iyo weliba faaiida-qaybsiga iyo dulsaarka dhab ahaan laga helay maagashiyada la geliyey saamiyo iyo waajibaad deyn oo gatay ama ballanqaadkooda lagu galay Soomaaliya oo la xiriira maagashiyo loo diiwaangeliyey sida ayaga oo ah wax soo saara kuna jira qorshooyinka horumarinta dhaqaale, ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan maalgashiyada loo diiwaangeliyey in ay yihiin kuwo wax soo saara (mira-dhal ah), sida laga fahmaayo qodobka 6aad, waxaasí xor ah loogu wareejin karaa dibedda ilaa qaddar ah boqolkiiba 15 raasumaalka la geliyey.

Haddii ay dhacdo in faaiidooyinka la helay, sanad kasta gudahiisa, ay ka hooseeyaan 15 boqolkiiba waxaa la oggol yahay in la uruuriyo qaybta (saamiga) aan la isticmaalin, xagga ujeeddooyinka wareejinta ku xaddadan saddexda sano oo soo socota, kuwaas oo marka laga gudbo (la dhaafo/ay dhammaadaan) maalgashaduhu uusan xaq u yeelaneynin wareejinta qaybta aan la isticmaali, ee ku xigta.

Raasumaallada la xiriira maalgashiyada horey loo soo sheegay, oo ka yimid qiyaas ahaan xaasilka dambe, sí xor ah ayaa dibedda loogu wareejin karaa kaddib shan sano oo ka bilaabaneysa taariikhda diiwaangelita, haddii laga reebo goáan sababeysan oo uu soo saaro Guddiga Maalgashiga Dibadeed oo muddadaas hoos u dhigi kara wax aan ka yareen 3 sano. Wareejinta qudheeda (nafteeda) waxa ay ku dhaceysaa lacagta adag oo asalka ah.

Isticmaalka lacagaha aan loo oggolaan wareejinta oo ku saleysan qodobkan waxaa loo sameyn karaa sí waafaqsan habka ay jdeeyaan axkaamta xagga canshuuraha, ee la soo saari doono oo ka nastaha kuwa jira (dhaqagalka) goorta la sameynayo wareejita nafteeda (qudheeda).

**Qod. 8**
**Dib-u-Maalgashiga Faaiidooyinka**

Dib-u-maalgashiga qayb ka mida ama dhammaan faaiidooyinka ka yimid shirkad kale oo diiwaangashan loona wareejin karo dibedda sida laga fahmaayo dodobka 7aad, ee isla shirkaddaas gudaheeda ama xagga shirkadda diiwaagashan, waa la gaarsiiyo Guddiga Maalgashiga Dibedda kaas oo, marka la xaqiijiyo ansaxnimada qoraallada, waxa ku dhaqaaqayaa in uu diiwaangeliyo tirada lacagta ku kordheysa raasumaalka bilowga la geliyey laga diiwaangeliyey iyo, laga bilaabo goortaas, faaiidooyinka ka yimaada sharcigan waxaa lagu dul xisaabinayaa raasumaalka aasaaska oo lagu daray qaybaha faaiidooyin dib-loo-maagashay lana diiwaageliyey.

Dib-u-maalgashiyada ku xusan xubinta (faqradda) hore waxa ay ka baxsan yihiin

ruqsad kasta.

**Qod. 9**
**Wareejinta iyo Iibka Maalgashiga Dibadeed**

Axkaamta sharcigan waxaa la dabbaqayaa xataa marka maagashadaha asalka uu, dhammaan iyo qayb ahaan,tacabka uu ku helay Soomaaliya Ku wareejinayaa qof kale oo dabiici ah ama qof sharcigu sameeye oo ah ajnabi ama muwaadin soomaali oo dibedda deggan.

Loo-wareejiyuhu waa in uu wareejinta qudheeda, shan iyo taban maalmood gudahood, ku ogeysiiyo Guddoonka Golaha Wasiirrada – Xafiiska qorsheynta – Wasaaradda Maaliyadda, wasaaradda Wershadaha iyo Ganacsiga. Marka la gudbo muddadaas, loo-wareejiyuhu waxaa uu weynayaa faaiidooyinka ku xusan sharcigan.

Haddii ay dhacdo wareejin qayb ah ama dhammaan ah oo loo sameeyey muwaadin soomaaliyeed oo deggan Soomaaliya, wareejiyuhu iyo loo-wareejiyuhu waa in ay, shan iyo toban maalmood gudahood, wargeinlin *ogeysiis( ku siyaan Guddoonka Golaha Wasiirrada - Xafiiska qorsheynta- Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Wershadaha iyo Ganacsiga, laga bilaabo taariikhdaasna waxa uu joojinayaa ku naalloodka faaiidooyinka uu dhigayo sharcigan oo ku xaddadan qaybta la wareejiyey.

Wargelinta (ogeysiiska) kor ku xusanwaa i ay wehliyaan qoraallada (dokumentiyada) caddeynaya maxsuulka la fuliyey.

**Qod. 10**
**Xuduudda iyo Habraaca Deymaha Gudaha**

Shirkada loo diiwaangeliyey, sida uu qago sharcigan, waxa ay yeelan karaan shirkad ama maalqabeen dibadeed amaba shirkad ama maaqabeen soomaali ah.

Shirkadaha maalgabeennada waxa ay deyn ku geli karaa gudaha Soomaaliya, muddo dhexe iyo midfog, waxa ayna soo saari karaan saamiyo deymrrd (obbligazione/waajibaad) oo ku xiran shuruuduha soo socda:

a) — marka ay khuseyso shirkad qaab farac shirkado ama maalqabeenno dibadeed ama shirkado soomaaliyeed oo aysa ka-qaybgal (saami) ku lahayn muwaadiniin soomaaliyeed oo deggan Soomaaliya, isku-darka deymaha iyo saamiyada ahaada (iltisaamaadka) waa in uusan ka badnaan boqolkiiba 50 raasumaalka guud oo la soo geliyey Soomaaliya;

b) — marka laga hadlayo shirkado loo dhisay qaab shirkado soomaaliyeed oo ku jiro ka-qaybgal (saamiyo) ay ku leeyihiin xataa dad soomaali ah oo deggan Soomaaliya oo ku darsaday qaddar aan ka hooseyn (ka yareyn) boqolkiiba 30, isku-darka deymaha saamiyada deymeed (waajibaadka deyn-siinta) waxa uu ka badan karaa boqolkiiba 50 raasumaalka oo idin (oo dhan) ilaa ugu badnaan boqolkiiba boqol.

Goorta ka-qaybgal raasumaalka dibadeed uu ku dhaco qaab saxiix (yabooh) kordhin raasumaal saamiyeed, ee oo shirkado soomaali oo nooca saamileyda ah, axkaamta xubinta (faqradda) hore waxaa lagu dabbaqayaa deymo iyo saamiyo-waajibeed (saamiyodeymeed) oo la kala xambaari doono amala soo saari doono kaddib kordhinta horey loo soo sheegay.

Saamiyada ay-yeelashada shirkadaha, lagu tilmaamay xubnaha (faqradaha), ku yeelanayaan shirkado soomaaliyeed, ee kale, ama ajnabi ah, oo ka hawlgala gudaha

Soomaaliya,waxaa lagu la wareegi karaa kaliya, in loo cuskado ruqsad loogu talagay oo lagu bixiyo amarka Wasiirka Maaliyadda, marka la dhegeysto ráyiga ay khasabka tahay in la raaco, ee Guddiga Maalgashiga dibedda.

Deymaha ay suuqa soomaaliyeed ku galeen shirkadaha, kuwaas gudahooda lagu la wareegay saami ka – qaybgal, oo ay u jiraan soo-saaridda saami-deymeedyada, waxaa loo xisaabaasida taahoo ay shirkaduhu toos ugu la wareegeen shirkadaha, ee uu soo dhex galay raasumaalka dibadeed, xagga ujeedooyinka xubnaha (faqradaha) labaad iyo saddexaad, ee qodobkan.

Hawlgallada deyn-qaadashada muddada dhexe iyo midda fog iyo soo saaridda saamiyo-deymeed oo uu dhigayo qodobkan, waa in la gaarsiiyo (ogeysiiyo/wargeliyo goorta la sameynayo).

Xagga dhowritaanka shuruudaha loo dejiyey hawlgallada laga hadlaayo, marka maalgashyada, ayada oo la raacayoxubinta (faqradda) labaad, ee qodobkan, lagu fuliyo shirkado leh qaabka shirkadaha soomaaliyeed oo ay ku jiraan saamiyo ay leeyihiin muwaadiniim soomaali ah oo deggan saamiyo ay leeyihiin muwaadiniin soomaali ah oo deggan gudaha Soomaaliya. Maalgashaduhu waa in uu waa in uu siiyo Wasaaradda Maaliyadda waxayaabaha lagama maarmaanka ah si la dejiyo (sameeyo) xiriirka ka dhexeeya raasmumaalka ajnabiga iyo ka guud guud, ee bulshada.

Dhowrid-laáanta axkaamta ku xusan qodobkan waxa ay ka-qaybgalayaasha dibedda ku keeneysaa in ay ka dhacaan (lumiyaan) faaiidooyinka uu dhigayo (jideynaayo) qodobka 7aad, haddii laga reebo, beddelkiisa, dabbaqidda faaiidooyinka yaryar oo dhigayo qodobka 12aad, ee soo socda.

## Qod. 11
## Xuduudda iyo Habraaca Deynqaadashada Dibedda

Qof kasta oo dabiici ah ama sharci ah, oo ay ku jiraan hay'adaha dawliga ah, Soomaali ama ajnabi, oo hawlahooda ka wata Soomaaliya, kuwaas oo damacsan inay deyn ku soo qaataan qaab kasta iyo muddo kasta. waa in ay dalab ruqsad hor-dhigto Guddiga Maalgashiga Dibadeed iyada oo loo marayo Xafiiska Qorsheynta ee Guddoonka Golaha Wasiirrada, ayada oo arjiga raacineysa dukumiintiyada muujinaya sababta amaahda, shuruudihii horay loogu heshiiyey iyo dhammaan qodobbada kale ee góaanka.

Ruqsadda (ggolaanshaha) kor ku xusan looma baahna xagga howlgallada caadiga ah ee qiimo dhimista saamaynta ganacsiga, furitaan amaah bangiyeed, bixinta oggolaanshaha dib u dhigista lacag-bixinta la xiriirta gadasho badeeco, waase haddii ay khasab tahay in hawlgalladaas ka baabíyo, iyada oo aan cusbooneysiin dheeraad ah ama kordhin lagu sameynin, muddo ka yar laba iyo toban bilood.
Guddiga Maalgashiga Shisheeye wuxuu ugu dambeyn go'aan ka gaarayaa codsiyada oggolaanshiyaha (ruqsadaha) deymaha xagga dibedda.

Waxaa la oggolaan karaa oo kaliya amaaha ah kuwa loogu talagalay ujeedooyin wax soo saar ee danta guud, amaba diiradda saaraya horumarinta shaqada, kordhinta wax-dhoofinta ama horumarinaya in Soomaaliya laga soo saaro badeecooyin, oo haaddi taas la waayo dibedda laga soo waaridi lahaa dibedda.

Guddigu, bixinta oggolaanshaha, waxa uu qaadi karaa wixii tallaabooyin taxaddir, ee ku habboon, si qulqulka raasamaallada dibadda oo ka imanaya deymaha uusan u carqaladeyn suuqa lacagta, waxa uuna awoodaa, iyadoo lala heshiiyo hay'adaha awoodda u leh, waxa uu sameyn karaa kontroollda lagama maarmaanka ah u diyaari jeegaga lagama maarmaanka ah si

loo hubiyo (xaqiijiyo) in raasamaallada la sheegay ay, dhab ahaan iyo gooni ahaan, yihiin kuwo loogu talagalay ujeeddooyinka deymaha loo oggolaaday.

**Qod. 12**

**Diiwaangelin Maalgashiyo aan wax.dhalin ama aan ku jirin Qorshooyinka Horumarin Dhaqaale, ee Soomaaliya**

Goorta Guddiga Maalgashiga Dibedda, inkasta oo uu diiwaangeliyo wareejinta, ay la ahaato in maalgashiga raasumaalka ah ee la soo geliyey Soomaaliya ama maalgashiyada ku xusan qodobka 6 aysan ahayn kuwo miro dhala (wax dhala) marka loo eego macnaha ku xusan qodobka hore ee 4. haddana aan ku jirin qorshayaasha horumarinta dhaqaalaha, faa'iidooyinka, dakhliga hantida, dulsaarrada iyo miraha maalgashiga hantida maguurtada ah ama daryeellada iyo sidoo kale faa iidooyinka iyo dulsaarka dhabta ah ee laga helay maalgashiyada saamiyada ama saami-deemeydyada lagu iibsaday ama lagu saxiixay soomaaliga, waxaa dibedda loo wareejin karaa ilaa boqolkiiba 10 raasumaalka la geliyay (maalgashaday).

U-wareejinta dibedda, ee raasumaallada ka yimaada wixii maxsuul ah (la helay) ma dhici karto ka hor toddobada sano, laga bilaabo taariikhda diiwaangelinta, wareejinta lafteeda waxaa ay dhaceysaa, sida ku xusan go'aannada Guddiga Maalgashiga Dibadda, inta lagu gudajiro muddada ugu badan ee saddexda sano, ee soo socota, waxaana lagu sameynayaa lacagta adag, ee asalka ah.

Isticmaalka lacagaha aan loo oggolaan wareejinta sida ku xusan qodobkan waxaa lagu fulin karaa qaabka ay dhigaan axkaamta xagga canshuuraha oo u roon ay dhaceyso wareejinta.

Marka laga reebo xaddidaadaha ku xusan xubnaha (faqradaha) hore, maalgashiyada noocaas ah, halka ay ka diiwaangashan yihiin, waxay ku naalloonayaan dhamaan faa iidooyinka uu sharcigani siiyay marka laga reebo ka-dhaafka ajuurada dekadeed iyo cashuur dhaafka lagu xusay qodobka 13 ee soo socda.

**Qod. 13**

**Bursiinooyin Dekadeed iyo Canshuureed**

Xeerarka canshuuraha, ee la xiriira, nidaamka (sharciga) dekadeed iyo canshuuraha tooska ah iyo canshuurta dheeriga ah, ee la xiriirta, ee Dawladda Hoose, ee jirtawaqtiga diiwaangelinta raasumaalka ka taagan maalgashiyada ku xusan sharcigan, waa lagu sii-dhaqayaa maalgashiyada qudhooda, muddo toban sano ah oo ka bilaabata taariikhda diiwaangelinta, haddii laga reebo dabbaqidda xeerka canshuuraha ee aadka ugu roon.

**Qod. 14**

**Fududeynta Canshuuraha Xagga Dhismaha isku-darka iwm, ee Shirkado iyo Xagga Kordhinta Raasumaalka**

Muddada labada sano ah oo ka bilaabata dhaqangalka sharcigan, macaamalooyinka soo socda waxaa dul saaran halbeegga xisaabta canshuurta diiwaanka iyo rahanta, oo laga dhigay kalabar iyo ilaa ugu badnaan, sida ay u kala horreeyaan, 500 oo Shilin Soomaali ah iyo 1000 Shilin Soomaali ah:

a) — qoraallada macaamilo, oo lagu dhisayo shirkado, oo ay ku jiraan kuwa iskaashatooyinka, dulucdoodu tahay fulinta hawlo warshadeed, beereed, dhisid iyo gaadiid;

b) — qoraallada (dukumintiyada) khuseeya isku-darka, uruurinta ama kordhinta raasamaal si kasta oo ay u fuliyaan shirkadaha fulinaya howlaha ku cad faqradda a);

c) — qoraallada ku saabsan soo-saaridda iyo baabi'inta saamiyo-deymeedka oo ay soo saareen shirkadaha fuliya howlaha. ku xusan faqradda a), iyo sidoo kale qoraallada la xiriira hay'adaha, dhimista iyo tirtiridda rahanta dammaanadda u ah saami-deymeedyada (waajibaaddeymeedka) qudhooda iyo hawlgallada kale ee maaliyadeed;

d) — qoraallada caadiyeenta shirkadaha aan caadiga ahayn ama sharciyeesneyn dulucdoodu tahay waxqabad dhaqaale, ee kasta.

Khidmadda oggolaanshaha (ruqsadda) dowladda ee ku-minguurinta Diiwaanka Shirkadaha oo uu farayo qodobka 51aad, ee xeerka xukuumadda. 22 Disember 1938, eel r. 1454 iyo xuquuqda notaayaha oo ay jideysay tariifada ku lifaaqan xeerka lamba. 65, ee 29 Juun 1951, ayada oo ay la socoto korosiimada dheeraadka ee ku xusan ku xusan xeerka lamba. 159, ee taariikh 6 agoosto 1905, waxaa laga dhimay afar-meelood oo meel, ayada oo lala xiriirinayo qoraallada ku xusan xubinta faqradda) hore.

Faa'iidooyinka horey loo soo sheegay waxaa la bixinayaa xataa haddii ay jiraan yabooh cusub oo kaash ah, hanti ama amaah ama shirkado cusub oo damacsan in ay la wareegaan hawlihii warshadaha, beeraha, dhismaha ama gaadiidka ee jiray, si loo ballaariyo, loo cusbooneysiiyo, wax looga beddelo ama dib loogu howlgeliyo (loogu kiciyo).
Haddii kororka raasumaalka shirkaduhu ku yimaado iyadoo la isticmaalayo baaqiyada macaash qiimayn, canshuuraha la xiriira iyo, xaaladdaas, boqolkiiba seddex ka mid ah baaqiga la isticmaalay loona wareejiyay raasumaalka.

Iltisaamaadka iyo saamiyada ay soo saareen hayada oo uu dhigayo sharcigan, iyo weliba shirkadaha iyaga oo adeegsanaya faa iidooyinka ku xusan qodobkan, marka laga reebo kuwa xaaladooda caadi ka dhigay ee qabta howlaha dhaqaale ee aan ahayn warshadaha, beeraha, dhismaha ama gaadiidka, waa laga dhaafay canshuurta beddelka ee boollada iyo diiwaanka, laga bilaabo taariikhda yaboohooda, waase haddii saamiyada iyo iltisaamaadka (waajibaadyada) laftooda la soo saaray iyadoo ku xiran maalgashiga xagga ku darsashada raasumaalka cusub Xataa soomaali ah.

**Qod. 15**
**Dammaanadda Maalgashiyada Dibedda**

Shisheeyaha iyo muwaadiniinta ku nool dibedda ee howlo dhaqaale ka fuliya Soomaaliya, waxay ku naaloonayaan isla sida loola macaamaloodo muwaadiniinta Soomaaliyeed oo deggan Soomaaliya ee fuliya isla hawlahaas.

Shirkadaha la aasaasay, la ballaariyay, la cusbooneysiiyay, dib loo howlgeliyay ama loo beddelay oo ku jiro raasumaal ajnabi loolama dhaqmi karo si ka hooseeya shirkadaha kale ee waddaniga ah ee ka jira Soomaaliya.

Hantida shirkadaha ka diiwaan gashan, sì waafaqsan sharcigan waa laga dhaafay gòoaanno la wareegid hanti - marka laga reebo xaalad dan guud, qarameyn ama qaab maamul kale oo si khasab ah loogu wareejiyo lahaanshaha (milkiyadda).

Hantida shirkadaha laftoodu waa laga dhaafay oo ma hoos imanayaan tallaabooyinka maamul, ee xajsiga (qabashada) iyo la-wareegidda ku meel gaarka ah toona, marka laga reebo haddii uu dhaco dagaal "inta ay socoto'muddadaas, sì waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee ku saabsan mowduuca.

**Qod. 16**
**Habraaca Dhexdhexaadinta**

Muran (isqabad) kasta ka dhex dhaca milkiilaha shirkad ama maalgashi diiwaangashan, sida uu qabo sharcigan, iyo xukuumadda Soomaaliya, ee la xiriira fasiraadda iyo dabbaqidda

sharcigan, waa in lagu xalliyo, ilaa inta suurtagalka ah, ayada oo loo marayo doodo iyo heshiisyo dhex mara cidda ay khuseyso iyo GuddigaMaalgashiga Dibedda.

Haddii aan heshiis lagu gaadhin sagaashan maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda labada dhinac midkood kan kale u soo gudbiyey dulucda khilaafka, arrinta waa in loo geliyo habraac dhexdhexaadin. Guddiga dhexdhexaadinta (xallinta khilaafka), haddii aysan si kale labada dhinac ugu heshiin, wuxuu ka kooban yahay dhexdhexaadiye ay magacawday xukuumadda Soomaaliya, mid kale oo ay magacawday cidda ay khuseyso iyo mid saddexaad oo ay wada magacaabaan labada hore (dhinac), haddii taas la waayana, uu magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Caddaaladda, ee Soomaaliya.

Guddiga Dhexdhexaadinta ( xalinta khilaafaadka) ee kor ku xusan wuxuu kaloo awood buuxda u leeyahay in uu góaan ka qaaro dhammaan arrimaha arrimaha habraaca oo ay dhinacyadu ku heshiin waayaan.

## Qod. 17
## Hawl-u-Fududeynta Shaqaalaha u Shaqeeya

Guddiga Maalgashiga Shisheeye wuxuu xaqiijinayaa in hey'adaha socdaalka ay fududeeyaan bixinta rukhsadaha iyo dal-ku-gallada fiisooyinka) lagama maarmaanka u ah soo gelitaanka iyo deganaanshaha Soomaaliya iyadoo loo daneynayo shaqaalaha ajaanibta ah ee ka shaqeeya shirkadaha u diiwaangashan sida uu qabo sharcigan, iyo weliba sidoo kale qoysaska ay ka soo kala jeedaan. Illaa haddii qof ama dad laga hadlaayo ay tahay/yihiin kuwo aan la rabin (aan loo baahnayn). Shaqaalaha ajnebiga ah oo aan kafaaáda lahayn (aan u qalmin) marnaba kama badan karo boqolkiiba shan shaqaalaha Soomaalida ee ka shaqeeya shirkadda.

Isla guddigaas wuxuu hubiyaa in shaqaalaha kor ku xusan iyo qoysaskooda loo oggolaaday inay galaan xarumaha kala duwan ee Soomaaliya sababo la xiriira shaqadooda. marka laga reebo meelaha sharcigu mamnuucay.

Shaqaalaha laga hadlayo waxaa loo oggol yahay inay si xor ah ugu wareejiyaan dalkooda ay ka yimaadeen ama ay deganaayeen ilaa 50 boqolkiiba ajuurada xooggooda, mushaaraadka, gunooyinka xaqal ciidka iyo wax kasta oo ay shirkadda ay ku tiirsan yihiin ku siiyaan.

Soomaaliya. Guddiga: maalgashiga Dibedda, asaga oo go'aan sababayn ku soo saaraya, waxa uu oggolaan kartaa wareejinta qayb ballaaran. Hase yeeshee aan ka badnayn boqolkiiba 75 mushaharka, mushaharka. Gunooyin xaqal ciidka ama waxtarro kale oo dhinacyada ay khuseyso lagu siiyay Soomaaliya.

Shirkadaha loo diiwaangeliyey, ayada oo la raacayo sharcigan, waxaa sidoo kale loo oggol yahay inay si xor ah ugu wareejiyaan dibadda, kaddi marka qoraal lagu muujiyo lacag-bixinta la sameeyey ama ku-shubidda lagu shubay xisaabaha loogu talagay, qaybaha (saamiyada) kharahaadka (culeysyada) bulsho oo caadiyan ayaga dibedda uga leeyihiin shaqaalaha ka shaqeeya shirkaddooda ka hawlgasha gudaha Soomaaliya.

Shirkadaha loo diiwaangeliyey, ayada oo lagu raacayo sharcigan, waa inay qoraan shaqaale Soomaaliyeed, intii suurtagal ah, isla markaana ay aqoonta iyo takhasuska shaqaalahan ku bixiyaan gudaha shirkadaha ay kala leeyihiin. Kaddib marka uu weydiisto Guddiga horey loo soo sheegay, shirkadaha qudhoodu waa inay soo gudbiyaan warbixin ay ku soo sheegaan natiijooyinka laga helay majaalkan.

## Qod. 18
## Waajibaadka soo Sheegidda, ee Xagga Hawlgallada la Xiriira Maalgashiyada Dibedda

Waxaa khasab looga dhigay Bangiyada, Notaayayaasha, iyo guud ahaan saraakiisha

dawladda, oo faragelinaya hawlgallada keenaya maalgashi raasumaal oo lagu sameeyo Soomaaliya, in ay gaarsiiyaan (ogeysiiyaan/wargeliyaan) Sanduuqa Wareegga Lacagta, ee Soomaaliya, habka (hababka) hawlgalladaas, soddon maalmood gudahood laga bilaabo gabagebada, ayada oo la caddeynayo lacagta adag, ee la wareejiyey iyo caddadkeeda.

Shirkadaha iyo ganacsiyada howlahooda ka fuliya Soomaaliya waa inay ku wargeliyaan Sanduuqa, horey loo soo sheegay, iibka wixii saamiyo ama qaybo ka-qaybgal laga iibinayo ajaanib ama muwaadiniinta Soomaaliyeed ee dibedda deggan, soddon maalmood gudahood oo ka bilaabata taariikhda iibka.

Wasiirka Maaliyaddu, markuu dhagaystay Guddiga Maalgashiga Dibadeed, isagoon wax u dhimayn ciqaabta ay dejiyeen xeerar kale, wuxuu awood u leeyahay inuu ku-xadgudbayaasha saaro, asaga oo ku soo saaraya xeerkiisa ah oo leh awood fulin, ciqaabo lacageed oo aan ka yareyn 1,500 Shilin Soomaali ah, aanna ka badnayn seddex jibbaar qadarka lacagta la maalgaliyay.

Ciqaabta ku xusan xubinta (faqradda) hore waa mid leh dabeecad maamul aruurinta waxaa la sameeyaa iyadoo la dhowraayo axkaamta xagga aruurinta dakhliga hatida (maalka) Dowladda. Go'aammada Wasiirka waxaa cabasho, lid ku ah, oo xagga ku xadgudubka sharciga iyo falka, loo qaadan karaa Maxkamadda Caddaaladda.

## Qod. 19
## Habka Wareejinta Raasumaaka iyo Faaiidada

Dibad u-wareejinta raasumaalka iyo faaiidada (macaashka), iyadoo la raacayo sharciga, waxaa lagu fulinayaa Sanduuqa Wareegga Lacagaha lacagta ee Soomaaliya iyo bangiyada uu kaas u wakiishay (igmaday) inay u shaqeeyaan sidii wakiilladiisa iyaga oo raacaya qodobka. 10aad, ee sharciga 8 Diseembar 1956, lamba. 15.

Codsi ka yimid cidda ay khuseyso (daneyneysa), ka dib ráyiga Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, Guddiga Maalgashiga Dibedda wuxuu u oggolaan karaa Sanduuqa inuu ku sameeyo wareejinta lacag ka duwan tii markii hore la keeni jiray.

Wareejinta waxay ku xiran tahay bixinta cashuurta dakhliga iyo wixii la xiriira dheeraad dawladda hoose. Si kastaba ha noqotee, Cidda ay khuseyso (daneyneysa) waxaa loo oggol yahay inay wareejiso raasumaalka iyo dakhliga hantida xitaa ka hor bixinta canshuuraha la soo sheegay, goorta uu xafiisyada maaliyada, ee awoodda ikhtisaas u leh, u soo bandhigo dammaanad u qalma (ku filan).

## Qod. 20
## Ka-saaridda Dabbaqaadda Sharciga

Axkaamta sharcigaan kuma dabbaqayo shirkadaha maalgashiga ku sameeya Soomaaliya ee xagga macdanta, saliidda iyo nukliyeerka. Maalgashiyadaas lagu dabbaqayaa axkaamta gaarka ah ee ku jira heshiisyada shaqsiyeed ee maanta ka jira Soomaaliya ama dhexmari doona xukuumadda Soomaaliya iyo shirkadaha maalgashiga sameeya.

Axkaamta sharcigan, sidaas oo kale, waxaan lagu dabbaqaynin shirkadaha ku howlan xagga duulimaadyada hawada ee gudaha Soomaaliya, haddii aysa u oggolaan heshiisyada caalamiga ah. iyo sidoo kale kuwa hawlo ka fuliya aagagga, waqtiga ansixinta (oggolaanshaha), ay xukuumadda Soomaaliya, iskeed ama ayada oo u mareysa ruqsad, ay maanaboolyo ku haysato (isku kaliyeysan ka-hawgalka), haddii aan waqti dambe la baabíin manooboligaas.

**Qod. 21**
**Xuduudda ka-noqoshada Iiwaangelita**

Diiwaangelinta ku xusan qodobbadii hore ee 5, 6 iyo 12 waa lala noqon karaa, sidaa darteedna maal-gashadayaasha dibedda ayaa waayi kara xuquuqda, mudnaanta iyo dammaanadaha lagu xusay Sharcigan, kaliya mid ka mid ah xaaladaha soo socda:

a) — haddii! hayaddu aysan bilaabin ganacsigeedii (hawsheeda), xaaladaha abuurista ama dib-u-hawlgelinta ama uusan sameynin ballaarinta ama is-beddelka, hal sano gudahood laga bilaabo taariikhda oggolaanshaha, haddii maal-galiyahu uusan u caddeynin Guddiga Maal-gashiga Dibedda in arrintan ay tahay amar Alle oo ka baxsan awooddiisa;

b) — haddii shirkaddu ay joojiso howlaheeda muddo ka badan hal sano, marka laga reebo haddii uu dhaco dagaal ama xaalad degdeg ah, ee Qaran;

c) — haddii shirkaddu, marka laga reebo kuwa haysta shaqooyinka meertada xilliyeed, muddo saddex sano ah gudahood ay joojiso, xataa sí aan joogto ahayn, waxqabadkeeda muddo guud ahaan la eg ama badan sanad, had iyo jeer marka laga reebo xaalad dagaal ama xaalad degdeg ah, ee Qaran;

d) — haddii shirkaddu, 90 maalmood gudahood laga soo bilaabo ogeysiiska qiimeynta ee xafiiska awoodda u leh, aysan u hoggaansamin waajibaadka qorista shaqaale Soomaaliyeed oo aan lahayn xirfad-aqooneed ilaa heerka ku xusan xubinta (faqradda) kowaad ee qodobka. 17aad;

e) — haddii maalgashaduhu ka tanaasulo diiwaangelinta.

**Qod. 22**
**U-oggolaanshaha Xeerarka Dambe oo aad Maslaxo ugu ah**

Ma jiraan wax ku jira sharcigan oo reebaya ka faaiideeysiga xeerar ugu maslaxo roon oo leh dabeecad guud oo mar dambe la soo saari doono.

**Qod. 23**
**Dhaqan Gelinta Sharciga**

Sharciga waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo taariikha lagu nashriyo (faafiyo) Faafinta Rasmiga.

Sharciga waxa uu dhaqagelayaa maalinta sharcigaas lagu faafiyo (nashriyo) Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga, ee sharciyada, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga. Nin kasta oo waajib ka saaran yahay in uu dhowro, inta kalana ku khasba in ay u dhowraan sida sharci ka mida shuruucda Soomaaliya.

Lagu sameeyey Muqdisho, maanta oo ah 18 febraayo 1960.

Maamulaha

**Mario Di Stefano**

Wasiirka Kowaad

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**